

SOMALI

## Taageere, hadal qaybiye, iyo xoghaye.

Gudi qoys oo Lawada shaqaynaya  
Waaxda daryeelka caruurta

FAMILIARÃO

Waaxda caruurta, dhalinyarada,  
iyo qoyska ee

Wariqad warbixin ah oo loogu talo galay ilmaha qofka taakuleeya ama taageera, qofka hadalka dadka u kala qaybiya, iyo xoghayaha.



Bufetat

Gudiga qoyska ama ehelku waa qaab bogu hoowigalab sidii qoyska iyo ehelkisa ama dadka ku dhow dhow ay xal ugu heli lahaayeen marka ay dhibaato adag kala dhex taalo waalidka iyo ilmaha uu qoysku ka kooban yahay.

Nidaamkani wuxuu xooga saarayaa, oo uu diirada ku eegayaa fursadaha, awooda, iyo dareenka is xilqaanimada ay leeyihiin ehelada ama dadka qoyska ku dhow dhow.

Waxaa markaas iyadoo la la wada shaqaynayo adeega badbaadinta iyo ilaalinta caruurta ama (Bamevernet) la abuurayaa gudigan qoyska oo hadafkisa ama ulajeedadiisu tahay sidii loo samayn lahaa qorshe ilmaha xafdaya ama xanaanaynaya.

### Sidee loo fulinayaa ama hoowigalabayaa gudiga qoyska?

- Adiga naftaada ama adeega badbaadinta iyo ilaalinta caruurta ayaa bilaabi kara oo soo jeedin kara in gudiga qoyska la sameeyo. Markaas kadib ayaa qoyska iyo adeega badbaadinta iyo ilaalinta caruurta ama (Bamevernet) si wada jir ah u sameeynayaan su'aalaha uu gudigan qoysku ka doodi doono, ayna tahay inuu xal u soo jeediyo.
  - Degmoyinka waxay isticmaali doonaan qof madax banana oo qoyska ka caawiya iskudubanida iyo hoowigalinta gudiga qoyska. Qofka iskudubandaha ah si joogto ah uguma shaqeyo adeega badbaadinta iyo ilaalinta caruurta ee degmada. Waxayna qofkaas shaqadiisu tahay inuu warbixin siiyo boqortooyada qoyska iyo ehelada, saaxiibada iyo dadka kale ee muhiimka ah ee qoysku xiriirka la leeyahay oo ayna doonayaan in uu ka mid noqdo gudigan.
  - Kulamada gudiga qoyska ayaa kadib la guda gali doonaa. Waxaa xeer muhiim ah in diirada la saaro daraha ilmaha. Caadiyan ilmuhu waa goob jooge marka kulanka dhacayo. Kulanka gudiga wuxuu socda ayaa mudo 3 ilaa 6 saac ah oo loo kala qaybinayo 3 wejji ama qaybood.
1. Qaybta ama wejiga koowaad waa mid loo wada dhan yahay oo ay goob joog yihiin dhamaan inta xubnaha ka ah oo ka qayb qaadanaysa kulanka, oo ay ku jiraan iskudubandaha, aqoonyahanada dibada laga keenay, iyo adeega badbaadinta iyo ilaalinta caruurta ama (Bamevernet). Aqoonyahanadu waxay bixin doonaan wixii warbixin muhiim ah oo ku saabsan xaalada ilmaha. Warbixintaas waa kuwo kala dulmaray oo horey loo ogaysiiyay waalidka iyo ilmaha.
  2. Qaybta ama wejiga labaad ee kulanka waxaa ka soo qayb gali doona oo kaliya ehelada ama dadka xiriirka la leh qoyska. Gudiga qoyskuna wuxuu ka doodi doonaa iskuna

af-garan doonaa qorshe qoraal ah oo wax ka waraajin doono ilmaha xaaladooda. Hadii loo baahdo waxaa inta kulankaas lagu jiro loo yeeri karaa iskudubandaha, iyo adeeg badbaadinta iyo ilaalinta caruurta ama (Bamevernet).

3. Qaybta ama wejiga saddexaad ee kulanka gudiga qoyska waxaa imaan doona iskudubandaha iyo adeega badbaadinta iyo ilaalinta caruurta ama (Bamevernet) si loo qiimeeyo qorsaha la isku afgartay.

- Dhaqan galinta qorsaha waxaa lagu qiimayn doonaa caadiyan hal ama dhowr kulan oo daba soco on doonka kulamadii hore ee gudiga qoyska.

### Ma ku dhacaa midan?

Waxaa laga yaabaa inaad ka baqaysa in dadka kale ogaadaan dhibaatooyinka aad la tacaalaysaan, laakiin dad badan ayaa tijaabiyay nidaamkan gudiga qoyska oo ka helay xirfad ay ku sheegeen inay ku dareemeen in ehelka iyo saaxiibadooda ay si wanaagoodu ku jiro isku xilqaameen oo ay ku hoolmanaayeen wixii u dan ah waalidka iyo caruurtooda. Baaris noorwiji ah oo wayn oo la sameeyay 2006 ayaa natiijadeedu noqotay inay waalidintii ka qayb gashay ay amaaneen kuna booriyeen in waalidintii kale ay qabsan qaybiyaan nidaamkan gudiga qoyska.

Yaboohan ama biwinta ku saabsan nidaamkan gudiga qoyska waxaa loo dhisaa si tartiib tartiib ah oo way kala duwan tahay sida degmoyinka kaleduwanii ay u soo agaasiyaan. Madoonaysaa inaad wax badan ka ogaato nidaamkan gudiga qoyska? Waxaad taas kala xiriiri kartaa adeega badbaadinta iyo ilaalinta caruurta ama (Bamevernet) ee degmadaada ama eeg shabakada internetta ee [www.bufetat.no/familieraad](http://www.bufetat.no/familieraad)

### Warbixin kooban oo ku saabsan nidaamka gudiga qoyska

- Gudiga qoyska waa yabood ikhtiyaar loo leeyahay oo diirada saaraya ilmaha.
- Qof iskudubandaha ayaa qoyska ku caawinaya qorsheynta iyo hoowigalinta gudigan.
- Gudiga qoyska waxaa lagu marti qaadayaa inay ka soo qayb galaan qoyska, ehelka, iyo dadka kale ee muhiimka ah ilmaha. Aqoonyahanada kale waxay kaliya oo ka qayb gali doonaan kulamada qaakood.
- Adeega badbaadinta iyo ilaalinta caruurta ama (Bamevernet) ayaa eegi doona, aqoonsana doona qorsaha go'aanka lagu gaaro, hadii uu yahay mid damaanad qaadaya amaanka ilmaha.



**FAMILIERÅD**